

Qoorgooyaha(Mininjaaytis) iyo Dhiig wasaqawga

Qoorgooyaha iyo dhiig wasaqowga waa cudurro aad u daran. Waxay saamayn karaan qof kasta da' kastaba, laakiin ilmaha dhashay, carruurta iyo dhallinyarada ayaa ugu qatar badan.

Mininjaaytis iyo dhiig wasaqow ma ahan wax caadi iska ah, laakiin waxay ku dili karaan saacado. Inta badan dadka way ka samatabaxaan haddii markiiba laga baaro, laakiin qaar si joogto ah ayay u naafoobaan iyadoo qaar kalena ay ku qaadato waqtii dheer inay ka soo kabtaan.

Sida ugu sahlan ee aad uga badbaadin karto qoyskaaga waa inaad ka talaasho. Laakiin qaar ka mid ah qoorgooyaha lagama hortagi karo, sidaas darteed aad ayay muhiim u tahay inaad taqaan cudurradan iyo astaamahooda. Qof walba oo qaba qoorgooyaha ama dhiig wasaqaysan wuxuu u baahan yahay caawin caafimaad oo deg deg ah.

Waa maxay cudurka Qoorgooyaha?

Qoorgooyaha waa isku soo ururka xuubka hoose ee ku wareegsan maskaxda. Nooca ugu qatarsan ee Qoorgooyaha waxaa sababa bakteeriyo.

Waa maxay cudurka dhiig wasaqow?

Sebtikaamiya waa dhiig wasaqow. Waxaa sababi kara isla bakteeriyada keenta mininjaaytis.

Waxaa kugu dhici kara isku mar qoorgooyaha iyo cudurka dhiig wasaqow.

Sidee u badbaadin karaa naftayda iyo qoyskaya?

- Sida ugu habboon ee aad u badbaadin karto carruurtaada waa inaad hubiso inay qaataan tallaalka lagula dagaalamayo cudurka mininjaaytis iyo dhiig wasaqowga. Tallaalada la siiyo dhammaan ilmaha dhasha ee barnaamijka tallaalka carruurnimada waxay ka badbaadinayaan noocyada kala duwan ee mininjaaytis iyo dhiig wasaqowga - **MenC, Hib** iyo **pneumococcal**, iyo mininjaaytis ay keento **cudurka qoor go'a**.
- Qof kasta oo ka wayn da'da 65, wuxuu heli karaa tallaalka **pneumococcal** mininjaaytis. Dadka jira da' kastaba ee qaba dhibaato caafimaad ee qatar gelin karta inuu ku dhaco cudurka pneumococcal waxay heli karaan in laga tallaalo.
- Tallalka Qaaxada (loo yaqaan **BCG**) wuxuu ka siinayaa badbaadin gaar ah carruurtaa cudurka Tiibii mininjaaytis. Waddanka Ayrland dhammaan ilmaha dhasha waxay qaataan waqtiga ay dhashaan, halka Waddanka Ingiriiska la siiyo ilmaha dhasha iyo carruurta waynaatay ee aan la tallaalin iyo dadka waawayn ee halis sare ay ku tahay Qaaxada. Tan sababteedu waxaa weeye halka ay ku nool yihin ama ay ku noolaan jireen, halka ay ka shaqeeyaan, ama sababtoo ah waalidkood ama awoowayaashhood ayaa ka yimid waddan uu cudurka Qaaxada aad u sareeyo.
- Dadka socdaalayaasha caalamiga waxay u baahan karaan 'afarlahaa' tallaalka cudurka qoorgooyaha. Tani waxay ka badbaadinaysaa cudurrada qoorgooyaha iyo dhiig wasaqowga ay sababaan afar nooc oo kala duwan: **Men A, C, Y** iyo **W135**. Shahaado tusaysa inaad qaadataay tallaalka 'afarlahaa' ACWY meningococcal saddexdii sano ee la soo dhaafay waa shardi ka mid ah codsiga dal ku galla xujayda iyo xilli shaqaaleedka doonaya inay galaan Waddanka Sacuudi Araabiya. Waa inaad ka qaadataa tallaalka iyo shahaadada dhaqtarkaaga ama xarunta socdaalayaasha ugu yaraan saddex usbuuc ka hor intaadan u socdaalin Sacuudi Araabiya. Haddii ay kula safrayaan carruur ka yar 2 sano jir, waa inaad tallashaa ka hor in ka badan saddex bilood intaadan safrin, sababtoo ah ilmaha yar yar waxay u baahan yihin laba tallaal oo ay u dhaxayso saddex bilood.
- Dadka u safra Afrika waxay u baahan karaan tallaalka afarlahaa. Dhaqtarkaaga ama xarunta socdaalka ayaa kuu sheegi kara waddamada qaba cudurka kuuna habayn kara tallaalka haddii aad u baahan tahay.

Xasuusnow, waxaa jira noocyoo dhawr ah ee cudurrada qoorgooyaha iyo dhiig wasaqowga oo aan laga hortagi karin. Inta badan cudurka qoorgooyaha ee Ingiriiska iyo Ayrland waxaa keena **MenB, mana jirto tallaal lagaga hortagi karo**. Sidaas darteed ayay muhiim u tahay ogaanshaha callaamadaha qoorgooyaha iyo dhiig wasaqowga si aad u badbaadiso adiga iyo qoyskaaga.

Waa maxay calaamadaha qoorgooyaha iyo dhiig wasaqowga?

Ogaanshaha calaamadaha

Fadlan u xafid tixraac ahaan

- Qoorgooyaha iyo dhiig wasaqow way adag tahay in la aqoonsado marka hore. Calaamaduhu si kasta ayay u kala hor muuqan karaan, laakiin calaamadaha hore waa caadiyan qandho, mantag, madax xanuu iyo dareemidda xanuu, sida xanuunnada caadiga ah. **"calanka cas"** ▶ ama calaamadaha digniinta hore inta badan waxay muuqdaan ka hor calaamadaha mininjaaytis sida dhaqaaq la'aan iyo dhibsasho iftiinka, iyo ka hor calaamado khatar ah ●.
- Qof kasta ma helo dhammaan calaamadahan.
- Cudurka dhiig wasaqow wuxuu dhacaas isagoo la socda ama aan la socon qoorgooyaha.

	Dhiig wasaqow	Mininjaaytis
Qandho iyo / ama mantag		
Madax xanuu daran		
Gacan-lug/kalagoysyada /muruq xanuuun (mararka qaar calool xanuuun / shuban)		
Gacmo qabow iyo lugaha / jarayn		
Midab cawlan ama jir dhibco midabyo kale duwan		
Deg deg u neefsasho/neefsasho la'aan		
Dhibco soo buuran (meel ka mid ah jirka)		 Mar walba ma muuqato
Qoor aan leexan karin		 Ku yar carruurla yar yar
Aan jeclayn iftiinka daran		 Ku yar carruurla yar yar
Aad u hurda badan/ maqan / ku adag tahay toositaanka		
Isku buuqsan/ hab dhaqan jahawareersan		
Qalal (sarco) waa la arki karaa		

Ma jiraan calaamado gaar ah oo laga arki karo ilmaha dhasha?

Haa. Calaamadaha kale ee laga arko ilmaha dhasha waxaa ka mid ah:

- Adag ama kuus jilicsan oo ka taagan madaxa ilmaha dhasha
- Diidaya wax quudashada
- Aan jeclayn markii kor loo qaado, oo oohin aad u daran ama cod sare leh samaynaya
- Jir jilicsan oo dhaqdhaqaaq ruxmaya leh, ama liicliicaya oo tabar daran


Iilmaha dhasha si deg deg ah ayay u xanuunsan karaan, sidaas darteed kormeer inta badan.

Qof kasta oo qaba qoorgooyaha iyo dhiig wasaqow ma leeyahay dhammaan calaamadahan?

Maya. Qof kasta ma helayo dhammaan calaamadaha waxay u soo kala hor bixi karaan sidii kasta. Haddii uu jiro dhibco kuusan, waa inaad samaysaa Tijaabada Galaaska Dhuuban. Ku riix galaaska dhuuban si aad ah halka jirka dhibicdu ka soo baxday. Haddii halka jirka dhibicdu ka soo baxday aysan dilaacin ama badalmin waadna ka arki kartaa galaaska, si deg deg ah u raadso caawin caafimaad.



Halka jirka dhibicdu ka soo baxday way adag tahay in laga arko jirka madow. Sidaas darteed ka raadi dhibco jirka oo idil, gaar ahaan meelaha laabatooyinka aan midabka lahayn sida luuqa faraha gacmaha iyo lugaha. Sidoo kale eeg caloosha, gudaha baalasha indhaha iyo saqafka afka.



Xasuuso, qof aad u jiran wuxuu u baahan yahay caawin caafimaad xitaa haddii ay jiraan dhawr dhibcood, dhibic jirka ah oo dilaacdha, ama mid aan is bedelinba.

Maxaan samaynayaa haddii aan u malaynayo in qof uu qabo cudurka mininjaaytis ama dhiig wasaqow?

Qof qaba cudurka mininjaaytis ama dhiig wasaqow si aad ah ayuu u jiran karaa, si deg deg ah. Sidaas darteed haddii qof jiran yahay, ka baar calaamadaha caadiyan. Haddii aad u malaynayo inay tahay qoorgooyaha ama dhiig wasaqow raadso caawin caafimaad si deg deg ah.

Ururka Cilmi-Baarista Qoorgooyaha **Lambar-lacag la'aah ah** qadka caawinta ee 24 saac

UK - **080 8800 3344**

Jamhuuriyadda Ayrlaand - **1800 41 33 44**

Xafiiska Guud:
Midland Way Thornbury
Bristol
BS35 2BS
Telefoon: 01454 281811

Xafiiska Iskoodlaand:
28 Alva Street
Edinburgh
EH2 4PY
Telefoon: 0131 510 2345

Xafiiska Waqooyiga Ayrlaand:
71 Botanic Avenue
Belfast
BT7 1JL
Telefoon: 028 9032 1283

Xafiiska Jamhuuriyadda
Ayrlaand:
63 Lower Gardiner Street
Dublin 1
Telefoon: 01 819 6931

Urur samafal oo ka diiwaan gashan Ingiriiska iyo Weelis lambar 1091105, Iskootlaand lambar SC037586, & Ayrlaand CHY 12030.

© Ururka Cilmi Baaritaanka Qoorgooyaha 2007

Translated by

K International plc

The Multilingual Solutions Company

